



## Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Nabarka 8-300

### Cadadda 8aad – Dhalinta/Da'yarta – Sharciyada iyo Habraacyada

#### Habraaca Xiritaanka Dhalinta/Da'yarta

**8-301              Shuruudaha Xereynta xirista ee Xarunta Xabsiyada Dhalinyarada ee Degmada Hennepin (JDC)**  
(10/07/08)

(A-D)

Xarunta lagu hayo dhalinyarada ee Degaanka Hennepin (Hennepin County) (JDC) waxay aqballi doontaa da'yarta da'doodu tahay 10 ilaa 17 jir oo kaliya haddii mid ama ka badan oo ka mid ah xaaladaha soo socda ay jiraan:

- Ilmaha waxaa lagu eeddeeyaa mid ka mid ah dembiyada soo socda:
  - Dhacdo kasta oo dhimasho keenleysa
  - Weerarka heerka (1aad, 2aad ama 3aad)
  - Weerar heerka 4-aad ah haddii sarkaalku uu arko ka dalbidda daryeel caafimaad rugta caafimaadka ama isbitaalka
  - Xadgudubka guriga ee darajada 5aad
  - Dhaqanka Galmaada ee Dembiyada darajada 1aad ilaa 4aad
  - Dhac aad u duran ama fudud
  - Afduub ama xadhig been ah
  - Gubashada darajada 1aad ee ganacsi/meherad, guri ama dugsi, oo ay ku jiraan walxaha qarxa, bamboooyinka iyo qaraxyada dhaloooyinka lagu cabeyyo ee gaaska iyo maryaha wata ee (molotov cocktails)
  - Haysashada hub
  - Hanjabaado argagixisanimo
  - Tuugeysi guri la degen yahay oo lagu daray garaash ku dheggan ama mid aan la deganayn halkaas oo gurigu yahay guri aan garaash lahayn
  - Isaga oo ka baxsanaya Booliska oo baabuur ku cayrsanaya
  - Xatooyo Baabuur
  - Walaxda/Daroogada la xakameeyey - haysashada ama qaybinta (waxaa laga reebay dembi yar)
  - Faragelinta markhaatiga
  - Dembiga DUI, Xeerka MN 169A.40 Subd.3: Dembiyada DUI qaarkood, Xarigga xabsiga.

JDC-da ayaa waxa laga yaabaa in lala xiriirro si loo xaqijiyo jiritaanka in la raacay shuruudaha xaaladda(ha) xirista:

Habraaca Xirista Dhalinta

Bogga 2aad ee 2  
bog

- Qofka dhallinta ah waxaa lagu soo oogay dembi culus oo cusub waxaana uu ku jiraa baxnaaninta-tijaabada dembi hore oo uu galay, ama waxa uu sugayaa maxkamad hore oo laalan/aan la gaarin, dembi weyn oo aan hanti ahayn ama xatooyo baabuur. Da'yarta ayaa lagu soo oogay dambi cusub, waxaana horay loo soo cadeeyey kaas oo ay xukuntay maxkamadda dadka qaangaar ah ama uu ku jiro sii-daynta lagu sharfay.
- Dhallintu waa Xukunka Dhallinta kaas oo La Dheereeyay (EJJ), inta ka yar 18 jir oo waxa uu leeyahay wax uun dacwad cusub ah.
- Qofka da'yarta ah wuxuu ku sugaran yahay dalabka maxkamadda taas oo amartay ku Kormeerka Guriga/Xabsi Guri waxaana lagu eedeebynaya dembi cusub ama in uu ka maqnaa habeen ama uu si weyn ugu xad-gudbay shuruudaha ilaalinta ee maxkamaddu ku amartay.
- Da'yartu waxa uu ka baxsaday xarunta dhaqancelinta ama xarun daawaynta ee ay amartay maxkamad ama kormeer kale oo xukun maxkamadeed ah.
- Maxkamaddu waxay soo saartay awood amar oo lagu haynayo.
- Da'yarta/Ilmaha yar ayaa jabiyey Amarka Xayiraadda la saaray, markaasna sarkaalka soo xirayana waxa uu haystaa lambarka RO wuxuuna bixiyaa isla xilliga marka la soo xiro.
- Dhallinku/da'yarku waxuu deggan yahay meel ka baxsan Degmada Hennepin waxaana loo xiray dembi.
- Maxkamaddu waxay soo saartay amarka beddidda goobta da'yarta lagu ilaalinayo oo aan ammaan ahayn keenaysana ilmaha aan qaan-gaarintu meel hoos-tagta xukunka degmada Hennepin.